

## **Dowladda Somalia oo ku howlan in Somalia lagu daro dalka Ethiopia**

### **Shabelle Media Network Somalia**

Last Updated Tue, Jan, 02 2007, 13:30 Pm--Mogadishu Somalia

**Mogadishu 02, Jan.07 ( Sh.M.Network)** – Dowladda Somalia ayaa sheegtay in ay sameyn doonaan qorshe lagu mideynayo dalalka Somalia iyo Ethiopia, iyadoo la baabi'inayo xuduudaha u dhaxeeya dalalkaasi, lana qaadanayo hal baasaboor, xilli kumanaan ka tirsan ciidamada Ethiopia ay joogaan gudaha Somalia.

Ra'isulwasaare K/xigeenka ahna wasiirka arimaha gudaha dowladda KMG ah ee Somalia, Xuseen Max'ed Ceydiid ayaa maanta markii ugu horeysay shaaciyay qorshe lagu damacsan yahay in lagu baabi'yo soodimaha u dhaxeeya dalalka Somalia iyo Ethiopia oo sida uu muujiyay ay yihiin dalal walaalo ah oo wadaaga xuduud aad u dheer.

Ing. Xuseen Ceydiid ayaa hadalkani ka sheegay kulan ay maanta ku yeeshen Odayaasha beelaha Guurtida Soomaaliyeed xarunta Villa Somalia, oo looga hadlayay arimaha amniga iyo wada shaqeynta



**Ing. Xuseen Ceydiid,  
Wasiirka arimaha gudaha**

" Ethiopia iyo Somalia waa dalal dhinaca siyaasadda saaxiibo ku ah, lehna xuduud 2 kun oo KM ah, loona baahan yahay in la baabi'yo xuduudaaasi, lana sameeyo hal baasaboor, hal dhaqaale iyo hal ciidan" ayuu yiri Xuseen ceydiid oo mithaal ahaan u soo qaatay in dalalka Yuruba ay midoobeen markii ay dagaalameen.

Waxa uu ku celceliyay isla markaana uu ugu baaqay beelaha Soomaaliyeed in la soo dhaweeyo ciidamada Ethiopia, isla markaana loo qalo xoolo.

Hadalka Xuseen Ceydiid ayaa ku soo beegmay xilli dhowaan Mudanayaasha Muqdisho qaar ay soo bandhigeen, xilli maxkamadaha ay maamulayeen Muqdisho, Qariirad ay tilmaameen in laga helay xafiiska RW Geedi oo aheyd qaaradda Africa oo ka maqan Somalia, iyadoo dhulka Somaliland ay ku jirto magaca dowladda Ethiopia, inkastoo qariiradaasi jiritaankeeda uu beeniyay ra'isulwasaaraha Somalia Cali Max'ed Gheedi

### **Shabelle Media Network Somalia**

**E-mail us: [info@shabelle.net](mailto:info@shabelle.net)**